

## Miisaaniyadda 2024: Maalgashi weyn oo dugsiyada iyo daryeelka caafimaadka ah

Febraayo 29, 2024

Waxbarashada iyo caafimaadka ayaa heli doona maalgashiga cusub oo ballaaran kaasoo kamid ah qorshaha cusub ee dhaqaale ee dowladda gobolka, kaasoo lagu dhawaaqay Febraayo 29.

Daryeelka caafimaadka:

- \$475 oo milyan oo lagu casriinayo nidaamka daryeelka caafimaadka aasaasiga ah ee Alberta, oo ay ku jiraan \$200 milyan oo labo sano ah oo lagu horumarinaayo helitaanka dhakhaatiirta qoyska.
- \$6.6 bilyan oo lacagta dhakhaatiirta ah, iyadoo sanadkii hore ka sii kordhay \$6.1 bilyan.
- \$1 bilyan oo muddo saddex sano ah soconaysa si loo hormariyo tayada daryeelka ee qeybta daryeelka sii socota.
- \$287 oo milyan oo muddo afar sano ah oo loogu tala galay goobaha caafimaadka cusub ee maskaxda iyo qabatinka maandooriyaha ah.
- \$20 oo milyan oo lagu sii wadayo qorshaha Isbitaalka Caruurta Stollery.
- \$35 oo milyan oo loogu tala galay ambalaasyo cusub

“Rikoorka maalgashi ee sannadkaan oo ah \$26.2 oo bilyan oo daryeelka caafimaadka ah wuxuu naga caawinayaa dhisidda baaxadda, yaraynta wakhtiga sugitaanka, kobcinta shaqaalaha daryeelka caafimaadka iyo in si wanaagsan loogu adeego dadka reer Alberta.”

*Adriana LaGrange, Wasiirka Caafimaadka*

Waxbarashada:

- \$1.9 bilyan oo saddexda sano ee soo socda loogu tala galay qorsheynta, naqshada iyo dhismaha. Sannadka 2024, waxaa socda 98 mashruuc oo dugsiyada ah.
- \$842 oo milyan oo muddo saddex sano ah si ay u ogolaadaan dugsiyada in ay shaqaaleeyaan in ka badan 3,100 oo shaqaalaha waxbarashada ah.
- \$1.5-bilyan oo loogu tala galay ardayda u baahan taageero dheeraad ah ama baahida gaar ah qaba.

“Miisaaniyadda 2024 ayaa taageeri doonta 43 mashruuc cusub oo dugsi si loo abuuro oo loo cusboonayo 35,000 goobaha arday badan.”

*Demetrios Nicolaidis, Wasiirka Waxbarashada*

### Su'aalaha warbaahinta

Gabrielle Symbalisy

Xoghayaha Saxaafada, Waxbarashada

780-218-8916

[gabrielle.symbalisy@gov.ab.ca](mailto:gabrielle.symbalisy@gov.ab.ca)

Andrea Smith

Xoghayaha Saxaafada, Caafimaadka

780-405-0775

[andrea.smith@gov.ab.ca](mailto:andrea.smith@gov.ab.ca)